



# **Ardayda Dugsiga Sarre ee PPS: Maalinta Khamiista iyo Jimcaha Waxaa Diyaara La Idiin Diyaariyey In Soo Doonataan Kumbuyuutaradii Chromebooks**

Waalidiinta Qaaliga ah ee PPS,

**Arday kasta oo wax ka barta Dugsiyada Sarre ee PPS kaasi oo u baahan kumbuyuutar waqtigni xaadirka ah, wuxuu tegi karaa mid ka mid ah sagaalka goobood ee lagu bixinayo maanta oo Khamiis ah ama Jimcaha saacadu marka ay tahay 8:00 subaxnimo ilaa 4:00 galabnimo si uga soo qaato chromebook.** Haddii aanad hore u buuxin xitaa sahankii lagu daysanayey kumbuyutarka, wali waad tegi kartaa oo aad ka soo qaadan kartaa kumbuyuutar goobahan soo socda:

Dugsiga Sarre ee Benson - 546 NE 12th Ave  
Dugsiga Sarre ee Cleveland - 3400 SE 26th Ave  
Dugsiga Sarre ee Franklin - 5405 SE Woodward St  
Dugsiga Sarre ee Grant - 2245 NE 36th Ave  
Dugsiga Sarre ee Jefferson - 5210 N Kerby Ave  
Dugsiga Sarre ee Madison @ Marshall Campus - 3905 SE 91st Ave  
Dugsiga Sarre ee Roosevelt - 6941 N Central St  
Dugsiga Sarre ee Wilson - 1151 SW Vermont St  
Xafiiska Xarunta Dhexe ee PPS - 501 N Dixon St

Ardaydu UMA baahna inay waalidiintoodu soo raacdoo goobaha lagu bixinayo, lamana weydiin doono ama uma baahna inay heshiiskii lagu daysanayey buuxiyaan. **Ardayda waxa looga baahan doonaa marka ay rabaan inay qaataan kumbuyuтара dhowrka arrimood ee soo socda:**

1. Aqoonsiga(ID) Iskuulka uu wax ka barto ee Oregon;
2. Aqoonsi Sawir leh (ID) ama inay Aqoonsiga(ID) ardaygooda keeni karaan ee Oregon;
3. Wuxuu tegi kartaa oo aad ka soo qaadan kartaa kumbuyuutar marka ay ardayda dugsiyada sarre la siinayo.

Lama ogoolaan doono in aad u qaado kumbuyuutar walaalahaaga kaa yar, qoysas kale, ama saaxiib. Qoysaska AAN dhammeystirin foomkii codsigii kumbuyuutaraka ee caruurta fasalada hoose kama qaadan karaan kumbuyuutar marka ay ardayda dugsiyada sarre la siinayo.

Intaasi waxaa dheer, kumbuyuutarada waxa kaliya oo qaadan kara ardayda, waalidiintooda/daryeelahooda, ama maamulayaasha PPS ee hadda.

Waxaan ku rajo weynahay in aan kula kulano!